



# MAQAALKA SADDEX BILOODKA AH EE JOOJINTAGUDNIINKA HABLAHA



NAFIS NETWORK MEMBER ORGANIZATIONS  
UNITE TO END FGM/C: QUARTERLY STATE  
MENT RELEASED IN SUPPORT OF NATIONA  
L AND REGIONAL CAMPAIGNS

## **BAAQ KU SAABSAN ANSIXINTA SIYAASADAHA IYO XEERARKA EE LA XIDHIIDHA JOOJINTA TACADIYADA KA DHANKA AH HABLAHA IYO HAWEENKA.**

---



Hayadaha Maxalliga ah, Ururada Bulshada iyo Xubnaha Dalladaha Danwadaag ee Gobolada Marodijeex, Togdheer iyo Sanaag, waxa ay baaq wada jir ah u dirayaan dawladda iyo goleyaasha sharci-dejinta inay si degdeg ah uga shaqeeyaan ansixinta siyaasadaha iyo xeerarka la xidhiidha Joojinta Tacaddiyada ka dhanka Hablaха iyo Haweenka Somaliland, kuwaas oo si guud u ilaalinaya xuquuqaha ay siisey diinteeна suuban iyo dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland

Siyaasadaha iyo Xeerarka Joojinta Gudniinka Hablaха waa qaар u baahan in golaha wasiiradda iyo goloyaasha sharci-dejintu ay ansixiyaan, sii loo joojiyo Caado-dhaqmeedkan oo khatarta ku ah caafimaadka hooyada iyo hablaха.

Tacadiyaddan ka dhanka ah Caafimaadka Hablaха iyo haweenka ee ay sabab u yihin caado-dhaqmeedkan muddo badan soo jiray; Sinnaba xaq uma aha in la jarjaro jidhka Hablaха iyada oo aan sabab caafimaad iyo mid diin ah toona loo hayn.

Sidaa daraadeed, Hayadaha maxalliga ah oo ay weheliyaan Bulshada rayidka ah ee Gobolka Sanaag waxay ugu baaqayaan dawladda Somaliland in ay ansixiyaan sida oo kale na ay fuliyaan Siyaasadda iyo Xeerka Joojinta Gudniinka Hablaха.

## **BAAQ-WADAREEDKA DALLADAH DANWADAAG EE ANISIXINTA SIYAASADDA IYO XEERKA JOOJINTA GUDNIINKA HABLAHA.**



Sida oo kale ururada iyo dalladaha danwadaag ee ka kala dhisan degmooyinka Maxamuud Haybe, Ibrahim Koodbuur, 31 ka May, Axmed Dhaga iyo gacan Libaax waxay isu soo baxyo ay ku muujinayaan sida ay u rabaan meal marinta iyo ansixinta Siyaasadda iyo xeerka jooninta gudniinka Hablaха waxaana ay ugu baaqeen dawladda JSL iyo goleyaasha sharci-dejinta ba in degdeg loo ansixiyo.

Baaqoodu na waxa uu dhignaa sidan hoos ku xusan:  
*Annaga oo ah Dalladaha Danwadaag ee ka dhisan degmoomiynka MAXAMUUD HAYBE, IBRAHIN KOODBUUR, 31 KA MAY, AXMED DHAGA IYO GACAN LIBAAX waxaan halkan isugu nimid inaan dirno baaq ku saabsan ansixinta Siyaasadda iyo Xeerka joojinta Gudniinka Hablaha, kaas oo aan Dawladda Jamhuuriyadda Somaliland iyo Golayaasha Sharci-Dejintaba kaga codsanayno inay dedejiyaan ansixintooda, si ay Hablaheennu uga badbaadaan dhibaatada uu keeno Gudniinku.*  
*Ururrada iyo Dalladaha Danwadaag waxa ay halkan ka sheegayaan in ay ka cidhib tireen Gudniinka Hablaha guud ahaan Degmooyinka gaar ahaan xaafadaha ay degaan xubnaha Ururada iyo Dalladaha Danwadaag.*

Wa Billaahi Tawfiiq

**DHAMAAD**